

## Duufaanada

Duufaan waa dabeyla xoog leh oo wata roobab. Raac talooyinkaan si aad ubadbaadid.

Si aad taageera uheshid ama macluumaad, ka garaac nambarka 2-1-1 telefoonkaaga ka dibna sheeg luqadda aad ku hadasha. Qof ayaa su'aalahaada kaga jawaabi doona afkaaga..

*Taxadarka Duufaanta* waxey micnaheedu tahay duufaan ayaa laga yaabaa in ay dhacda maalinta ama labada maalmood ee soo socda.

*Digniinta Duufaanta* waxey micnaheedu tahay duufaan ayaa soo socota maalinta xigta.

- **Dhageysa Idaacadaha raadiyaha.**
- Dhageysa idaacadaha raadiyaha \_\_\_\_\_ si aad luqaddaada ugu heshid macluumaad
- Siiwad dhageysiga ilaa aad ka maqasha luqaddaada si aad u ogaatid waxa socda iyo waxa aad sameynsa.-AMA-
- Waa inuu jiraa qof fahmaaya luqadda Ingriiska si uu kugu dhageysta raadiyah oo uu ugaada waxa dhacaaya iyo waxa **aad sameyneysa.**
  
- **Diyaar noqo.**
- Haddii aad haysato moobayl, haa lahaada dab ku fila.
- Haanta gaaska ee baabuurkaaga buuxi.
- Soo iibsaa cunta iyo biyaha dhalooyinka oo maalma yar kuugu filan.
- Waxyaabaha la dhiga guriga banaankiisa sida baasakiilka gudaha soo geli.
- Dami qalabka yaryar ee isticmaala korontada sida Telfishanka ama maykrowefka.
- Qolka qubeyska, dararka, iyo jaagagga ka buuxi biya nadiif ah. Biyahaan waxaa loo isticmaali karaa cabid, dhaqid, iyo nadiifinta musqusha.

### **Badbaad xiligga duufaanta.**

#### **Guriga:**

- Gudaha kujir. Kafogoow daaqadaha. Daaqadaha wey jabi karaan xiligga duufaanta.
- Aad meesha uugu hooseysa gurigaaga oona ka fog daaqadaha.
- Firinjeerka iyo barafeeyaha haa xirnaadeena si ay wax u qaboojiyaan.
- Isticmaal telefoonka marka ay xaalad daruuri ah jirta oo kali.
- Haddii ay korontadaada danta, gudaha haa ku isticmaalin shabaqa biraha leh ee wax lagu duba oo banaanka la dhigta. Wuxuu soo saari kara gaas oo kuwaxyeeyn kara ama kudili kara.
- Haa umaleynin in duufaanta ay istaagtay haddii wax dhawaq ah aad kamaqleynin banaanka. Duufaanta mar kale ayey si dhakhsi ah u bilaaban kartaa.
- Haddii gurigaaga fatahaad ay soo gasha, kabax guriga oo aad meel dhul sara leh

#### **Baabuurka dhaxdiisa:**

- Haa kaxeynin baabur marka ay jirta duufaan. Baabuur kaxeeynta waa khatar marka ay jiraan dabeyla xoog leh, roob iyo fatahaad.
- Haddii ay khasab tahay inaad kaxeysa baabuurka, isticmaali wadooyinka badbaadada leh oo kali.
- Haa kukaxeynin baabuurka jidgooyooyinka agagaarkooda.
- Haa isticmaaliin wadooyinka calaamadda xirnaashaha lasaaray.
- Haa kukaxeynin baabuurka biyaha fatahaada dhexdooda. Xitaa biyaha yar baabuurka wey qaadi karaan.

- Haddii uu baabuurkaaga kudama biyaha dhexdooda, kabax baabuurka ka dib aad meel dhul sare leh.
- Haa kaxeeynin baabuur habeenki marka uu jira mugdi.

**Duufaanta ka dib:**

- Dhageysa raadiyaha si aad u ogaatid waxa aad sameyneysa.
- Joog goobtaada ilaa lagaaga sheegaaya in ay nabad tahay inaad soo baaxda.
- Kafogoow khadadka korontada ee soo dhacay.
- Kaxeey baabuurka haaddii aad ku khasban tahay oo kali. Wadooyinka inaysan nabad aheyn ayaa laga yaabaa.